Bundesamt
für Migration
und Flüchtlinge

Qoraal wargalin ah oo khuseeya koorsooyinka isdhexgalka Bulshada

ee

- Dadka Magangalyo doonka ah ee haysta Ogolaashaha Degenaashaha sida uu qabo Qodobka § 55 Qaybta. 1aad ee Sharciga Qaxootiga
- Iyo Ajaanibta ku jooga sharciga dulqaadashada sida uu qabo qodobka § 60a Qaybta. 2aad Nambarka 3aad, Sharica Iqaamadaha
- Iyo sidoo kale Ajaanibta haysta sharciga degenaashada sida uu qabo qodobka § 25 Qaybta 5aad, ee Sharciga Iqaamadaha

Mudanayaal iyo Marwooyinka qiimaha leh,

Xaafiiska Federaalka u qaabilsan Arimaha Socdaalka iyo Qaxootiga ee loo yaqaano -Bundesamt für Migration und Flüchtlinge (BAMF) Waxa aad ka dalban kartaa, Ogolaasho in aad qayb ka qaadato koorsada is dhexgalka Bulshada, ee Intragrasyoonka loo yaqaano. Markaa haddii aad doonaysid waa in aad buuxisaa shuruudahaan ah:

- Haddii aad tahay Magangalyodoon, Tahayna Qof haysta Ogolaashaha joogitaanka, oo aad ka timid

Wadamadaan kala ah:

- Iiraan
- Ciraaq
- Siiriya
- Eritrea
- Soomaaliya

oo aadan Waddan kale soo marin, Kaas oo ka mid ah Wadamada ururka Yurub oo aadan ka dalbanin Magangalyo ama sida uu qabo Sharciga hirgalinta Dublin III ay khasab kugu ahayn in aad Wadan kale oo ka tirsan ururka Yurub aad ka dalbato Magangaylo,

ama

- Aad haysato Ogolaashaha Joogitaanka Habka Dulqaadashada ah sida uu qabo Qodobka § 60a Qaybta 2aad Nambarka 3aad, ee Sharciga Iqaamadaha ama aad haysasato Ogolaashada Degenaashaha sida uu qabo qodobka § 25 Qaybta 5aad, ee Sharciga Iqaamadaha.

Ogeeysiis: Haddii markii aad is dhiibaysay ee aad Megengelyada dalbanaysay, ama marka lagu waraysanaayay laguu ogolaaday in aad ka qayb qaadan kartid Waxbarashadaan ama Koorsaha loogu talo galay Barashada is dhexgalka Bulshada, markaa waxaad ogaataa in aadan u baahnayn in aad Dalab Mar Labaad qoratid.

KNr. 630.121e (Somalisch) BAMF 11/2017

Carruurta, Dhallinyarada iyo Barbaarta ay khasabka ku tahay in ay Iskuulka aadaan, kama ay qayb qaadan karaan koorsada Integrasyoonka.

Waa maxay koorsada Integrasyoonka?

Tan guud ahaaneed ee koorsada Integrasyoonka waxa uu ka kooban yahay laba qaybood oo kala ah, Koorasada barashada luqadda iyo koorsada la qabsiga Waddanka.

Tan koorsada barashada Luqadda waxa aad ku baranaysaa macnaha Ereyada aad ku hadlaysid ama sida Qoraalka loo qoro, kaas oo aad dhaqan maalmeedkaaga u baahan tahay. Taasna waxaa ka mid ah xiriirka Xaafiisyada marka ay Xafiisyada Dan kaaga xiranto, wada hadalka deriska ama Meesha Shaqada, qoridda Waraaqaha iyo buuxinta Foomka.

Tan la qabsiga Waddanka, waxa ay warbixin kaa siinaysaa habka nolosha Waddanka Jarmalka. Halkan waxa aad ku baranaysaa xoogaa habka Sharciga u shaqeeyo, Dhaqanka iyo Taariikhda Muddooyinka dambe ee Waddanka soo maray.

Koorsaha guud ahaaneed waxaa uu ka kooban yahay 600 oo xiiso waxbaraho ah (Halkii xisana waxa ay qaadanaysaa waqti ah 45 daqiiqo), Tan barashada la qabsiga Waddankana waa 100 xiiso oo waxbarasho ah. Tan barashada luqaddu waxa ay ka kooban tahay 6 qaybood oo gaagaaban, oo kiiba ay qaadanayso 100 xiiso oo waxbarasho ah. 300 xiiso ee ugu horraysa waxaa lagu magacaabaa tan barashada luqadda asaasiga ah, 300 ee xiiso ee ku xigtana waxaa lagu magacaabaa koorsooyin dhisidda barashada luqadda.

Waxaa jira sidoo kale koorsooyin Integrasyoon ah, oo khaas u ah, Dumarka, dadka waalidka ah, carruurta ama shakhsiyaadka aan sida saxda ah aan wax u akhrin karin ama aanan u qori karin. Koorsadaasna waxa ay qaadanaysaa illaa 1.000 xiiso.

Haddii aad si Dhakhso ah ama deg deg ah wax u baran kartid, waxa aad ka qayb qaadan kartaa koorsada dhakhsaha ah. Taasna waxa ay qaadanaysaa kaliya 430 xiiso.

Xarunta ama Hayadaha koorsada Integrasyoonka bixisa, ee lagu magacaabo „Koorso bixiye“ waxa ay kula yeelanayaan Kulan inta aysan bilaaban koorsada, oo imtixaan bay kaa qaadi doonaa, si u gartaan halka lagaaga bilaabayo. Kolkaas ayaana la go´aaminayaa nooca koorasda ama qaybaha koorsada ee adiga kuu fiican iyo Meesha aad ka bilaabi lahayd baa la garanaya. Imtixaanka lagu eego Heerkaaga waa lacag la´aan.

Ka qayb qaadashada imtixaanka qalinjibinta.

Imtixaanka xiridda ama qalinjibinta, waxa uu ka kooban yahay imtixaanka luqadda iyo imtixaanka ugu dambeeya ee ah ee lagu qaado la qabsashada nolosha wadanka oo lagu magacaabo „Ku noolaashaha wadanka Jarmalka“. Haddii aad imtixaanka luqadda Jarmalku ku baastid (Imtixaanka luqadda darajada B1 keentid) kuna baastid imtixaanka ku noolaashada wadanka Jarmalka“ aad ku gudubto, waxa aad maarkaas si guul ah ku dhamaysay koorsada Integrasyoonka. Kolkaas ayaa waxaa lagu siinayaa „Shahaadada koorsada Integrasyoonka“.

Haddii mid iyada ka mid ah ama labadaba aadan si guul ah ku samaynin, oo aad Imtixaanka ku dhacdid waxa lagu siinayaa Qoraal ku cad in aad Imtixaanka ku dhacday.

Ka qayb qaadashada imtixaanka xiritaanku ee qalinjibinta waa lacag la`aan.

Ogolaashada ka qayb qaadashada koorsada Integrasyoonka ee ay bixiso Xaafiiska Federaalka u qaabilsan Jinsiyada iyo Qaxootiga iyo qaadashada dalabka cidda koorsada qaabilsan

Fadlan u buuxi dalabka ogolaashada ka qaybqaadashada si buuxda ah, oo si fiican loo akhrin karo. Haddii cinwaanka aad adigu dhiibtay uu ku qoran yahay magac kale, aan kaaga ahayn fadlan ku

buuxi meesha ay ku qoran tahay Calaamadda C/O Qofkaas Magaciisa ee Adiga lagaa helo, haddii kale Boostada laguuguma keeni karo halkaas. Dokumentiga la socda Arjigana buuxi oo markaas Arjigaaga ku soo hagaaji Cidda kaa sugaysa.

Saxiixaaga ayaa waxaad ku ogolaanaysaa in warbixinta shakhsiyadaada ee ay diinwaangaliyeen Xaafiiska Federaalka u qaabilsan Jinsiyadaha iyo Qaxootiga ee khusaysa arrimaha socodsiinta koorsada Integrasyoonka ay baari karaan warbixinta shakhsiyadaada ku kaydsan Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada,. Taasina waxaa la doonayaa in la xaqiijiyo in aan layska ogolaanin ama loo ogolaanin ka qayb qaadashada koorsooyinka Interagrasoonka dad iska dhiibay wadan kale oo ka tirsan wadamada ka mid ah ururka midowga Yurub ama sida uu qabo sharciga hirgalinta Dublin III ay khasab ku ahayn in wadan kale ee ka mid ah wadamada ururka midowga Yurub joogaan, si markaa taas looga hor tago baa Warbixinada ku saabsan Magacaaga iyo wax la mid ah la sii baari doonaa.

Saxiixaaga waxaad kaloo ku ogolaanaysaa si loo baaro in ay jirto ogolaashada joogitaanka hab dulqaadka ah, sida uu qabo Sharciga Iqaamadaha § 60a cutubkiisa 2, sadarkiisa 3 ee sharciga degenaashada ama ogolaashada degenaashada ah sida uu qabo § 25 cutubkiisa 5 ee sharciga degenaashada.

Haddii laguu ogolaado in aad ka qayb qaadato koorsada Integrasyoonka, waxa aad ka helaysaa Xaafiiska Federaalka u qaabilsan ogolaashada khusaysa in aad xaq u leedahay ka qayb qaadashada koorsada Integrasyoonka ah, taasoo ah midda lagu magacaabo „Warqadda ogolaashada“. Warqadaas ogolaashada ah waxaa kale oo la socda liis ay ku qoran tahay meelaha koorsada barashada luqadda laga samayn karo ee u dhaw halka aad Adigu degan tahay.

Ogeeysiis: Haddii markii aad is dhiibaysay ee aad Megengelyada dalbanaysay, ama marka lagu waraysanaayay lagu siiyay Warqad Ogolaasho, oo kuu ogolaanaysa in aad ka qayb qaadan kartid Waxbarashadaan ama Koorsaha loogu talo galay Barashada is dhexgalka Bulshada, markaa waxaad ogaataa in aadan u baahnayn in aad Dalab Mar Labaad qoratid.

Ogolaashada laguu ogolaaday ka qayb qaadashada koorsada waxay jiri kartaa muddo saddex bil ah. Warqadda ayay ku qoran tahay Taariikhda uu Ogolaashaha dhacaayo. Fadlan markaa waa in aad iska soo diiwaangelisaa Halka laguu diray ee aad Koorsada ka heli kartid, oo Warqaddaan kuu ogolaanaysa Koorsada u geey. Haddii aan laguu Sheegin Meesha aad Koorsaha ka helayso, waxaad Adigu raatsataa Hayad kale oo aad Adiga ku qanacsan tahy oo Meeshaas iska diiwaangeli.

Waxaadse ogaataa Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, waxaa uu yeelikaa in uu si deg deg ah kuugu diro Meel aad Koorso si deg deg ah uga helaysid, si loo hubsado in aad Koorso deg deg ah heshid buu taasi u yeeli karaa.

Cidda koorsada bixisa waxay kuu warqad oo ay kuugu sheegayaan qiyaastii marka ay koorsadu bilaabanayso. Koorsadu waa in ay bilaabataa Lix bilood gudaheeda oo ka bilaabata marka aad is diin waan galiso. Haddii waqtigaas aan koorso la bilaabinna, waa in cidda koorsada samaynaysa ay adiga kugu wargalisaa.

Waxaad ogaataa in uu Ogolaasha kaa dhici doono haddii Adigoo aan Wax Xujo ah oo lagu qanci karo haysanin, Muddo Hal Sano ah Koorso raadsanin, ama inta aad bilaawdid Muddo Hal Sano ah Koorsada ka maqnaatid.

sida saxda ah ee koorsada looga qayb qaato

Si aad u gaarto ujeedada koorsada Integrasyoonkan, waa in aad sida saxda ah aad uga qayb qaadataa koorsada. Taasi macnaheedu waa in aad daruusta si joogto ah uga qayb qaadato illaa kooraska illaa uu dhamaado oo aad ka qayb qaadato imtixaanka xiritaanka. Uga qayb qaadashada sida saxda ah koorsada, waxa sidoo kale adiga muhiim kuugu tahay, haddiiba ay suurtogal tahay in waqti dambe aad casharada koorsada barashada luqadda aad doonaysid in aad ku ceshatid. Cidda bixinaysa koorsada waxa ay ku siinayaan caddayn ah in aad koorsada sida saxda ah aad uga qayb qaadanaysay, haddii aad adigu doonaysid.

Caruurta waa laguu hayn karaa

Haddii aad u baahan tahay in Caruurta laguu haayo Markau u Koorsaha kuu bilaabmo, Taasi aa aad codsan kartaa, oo u sheeg Cidda ku siinaysa Koorsaha, Iyaga ayaa ku siin doona Talo ah haddii ay Jirto Meel Caruurta lagu haayo.

Bedelaada cidda koorsada bixinaysa

Bedelesho aad iska bedeli kartid Koorso, waxaa keliya ay suurtogal ku tahay haddii aad Hal Qayb oo Koorso dhamaysid. Sidoo kale Bedelesho waxaa keliya la ogolaanayaa haddii ay jirto Sabab Muhiim ah oo lagu qanci karo, sida haddii aad Gurigaaga ka guurto, ama Koorso akel oo Midka aad ku jirtay kaduwan kuu soo dhaco, ama Koorsada aad u bedelan rabtid uu Caruurta kaa hayn karo, ama Shaqo Meel ka heshid, ama Qolada Koorsada ku siin rabta ay kuu ballan qaado in aad u shaqan doontid.

Haddii ay timaado bedelasho ka duwan taas, waqtiyaddii xiisadaha ah ee qayb koorska ah ee aadan mar dambe booqan waxa ay noqonaysaa mid luntay.

Haddii ay timaado sabab bedel, oo laguu ogolaaday, waa in cidda koorsada ka mas´uulka ah ay adiga kuu soo celiyaan warqaddii ogolaashada ahayd.

Kharajka koorsooyinka Integrasyoonka

Ka qayb qaadashada koorsada waa kuu lacag la´aan.

Kharashka Safarka

Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, waxaa uu u siin karaa Kharashka aad Koorsada ku aadaysid, waa haddii aad Adiga Taasi dalbatid, waxaadse ogaataa Kharashaka waxa keliya lagu ogolaadaa haadiii Meesha aad Koorsada ku baranaysad ay ugu yaraan 3 km ka fog tahay Guriga aad Adigu deggan tahay. Lacagta ama Kharashka waa mit aan go´nayn oo in qiyaasan ayaa laguu ogolaan doonaa, waa Kharash kaalmo ah, oo lagu xisaabo Inta Maalmood ee aad Koorso leedahay. Dalabkaaga Kharashka ku hagaaji Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, ee kuugu dhow ee ku yaalla Meesha aad deggan tahay. Cinwaanka Xafiiska halka uu ku yaalo waxaad ka heli kartaa Internetka Cinwaanka: www.bamf.de Halkaas ka raadso, oo Meesha ay „Suche“ ku qoran tahay ku qor Ereyga „Web-GIS“ markaa Meeshaas baad ka sii raadsan kartaa oo ku qor Ereyga „ Zuständige Regionalstelle mit Regionalkoordinator“ markaa ka bacdi riix Ereyga kuu soo baxa ee „Suche“ ah.

Ku laabashada ugu badnaan 300 oo Xiiso ahaan ee koorsada barashada luqadda

waxa marka la eego shuruudo gaar ah aad ku ceshan kartaa hal mar illaa 300 Xiiso oo ah kooraska luqadda. Si aad u heshana, waa in aad si buuxda und sax ah uga qayb qaadatay koorsada luqadda aadna ugu dambayntii aad samaysay imtixaankii luqadda, oo aadan ku gudbin imtixaankii (Heerka aqoonta luqada B1) ee luqadda Jarmalka.

Ka qayb galida in saacado lagu ceshadana, waxa waajib ah in dalab la samaysto. Fadlan ka same dalab Xaafiiska Federaalka BAMF ee Gobolka uu ku yaala meesha aad degan tahay.

Haddii aad booqanaysid koorsada dadka aan wax qorin ama akhrin, uma baahnid in aad ugu horraynta aad ka qayb qaadatid imtixaanka tijaabada, si aad u heshid fursad aad ugu ceshan karto 300 oo xiiso.

Waxaa kale oo aad u baahan tahay in aad ogaato

Wax alle waxa foomamka arjiga ah ee lagu sheegay warqaddan warbixinta ah, waxa aad ka heli kartaa cidda walba oo bixisa koorsada, Ausländerbehörde ama Xaafiiska Federaalka BAMF Gobolka ee uu ku yaalo qaabilsan meesha aad degan tahay. Sidoo kale waxa aad ka helo kartaa Foomamka, haddii aad Boggan Internetka aad gasho : www.bamf.de/formulare.

Sidoo kale waxaad la socotaa Waxyaabaha kale ee ay kuu diyaarsheen Heyadaha caawiya Dadka qaxootiga ah, Hayadaha Dhalinyarada caawiya. Waxaa ay diyaar kula yihiin in ay ku caawiyaan, waa haddii aad doonaysid, Wax Kasta oo aad waydiiso bay Jawaab kaa siin karaan, Dhibaatadaada u sheego, waxay kaloo kaa caawin karaan in ay kuu raadshaan Koorso Adiga kuu haboon. Halka aad Hayadahaas Dadka Qaxootoga iyo Dhalinyarada caawiya ka heli kartid waa, Xafiiska Degmadaaya ku yaalla ee Qaxootoga qaabilsan ee Sharciga laga soo qaato ama Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, amaba Internetka waa laga helaa.

Warqadda warbixinta waxa ku jira macluumaad muhiim u ah ka qayb qaadashada koorsada Integrasyoonka. Wixii kale oo su´aalo ah, waxaa idinka jawaabi kara cidda samaynaysa koorsada.

Waqtiga aad booqanayso koorsada Integrasyoonka kuma jirtid si sharci ah caymiska shilalka.

Waxaan idiin rajaynaynaa hor u mar wanaagsan ee booqashada koorsada Integrasyoonka!